

Tababar ku saabsan Xalalka waara oo loogu talagalay Bulshooyinka uu Barakacu Saameyey ee Somalia

Koorsada 3aad: Kulanka 1aad :Maxay tahay Guriyeyn, Dhul iyo Hanti maxaase udub dhexaad u ah Xalalka waara?

Faalo Kooban

Qeybtan saddexaad waxay diiradda saaraysaa Guriyeynta, Dhulka iyo Hantida, astaan muhiim ah oo ku saabsan geeddi-socodka Xalalka waara. Kulankan koowaad waxaan diiradda saari doonnaa qeexitaanka Guriyeynta, Dhulka iyo Hantida, iyo sharraxaadda in ay u baahan tahay wax ka badan saqafka madaxa qofka. Waxaan sidaas ku samayn doonnaa innaga oo tusinnayna in Guriyeynta, Dhulka iyo Hantida ay ku xiran yihiin qaabab sharciyeed oo kala duwan iyo in helitaanka xuquuqdan ay yihiin shuruudo muhiim u ah horumarka loogu talagalay dhanka xalalka waara. Waxaan bilaabi doonnaa aqoonsiga arrimaha ugu waaweyn ee la xiriira Guriyeynta, Dhulka iyo Hantida, iyo caqabadaha ay la kulmaan bulshooyinka ay saameeyeen barakacyada ee Soomaaliya iyadoo loo marayo daraasad kiis gaar ah. Qaybta ugu dambeysa ee kulanka waxaa u heellan yahay isku xirka shuruudaha Guriyeynta, Dhulka iyo Hantida, iyo xalalka kale ee waara si loo muujiyo isku xirnaanshaha u dhexeeya shuruudaha kala duwan iyo muhiimadda Guriyeynta, Dhulka iyo Hantida, ee geeddi-socodka xalalka waara. Waxaa takiidin la saaraa inta uu socdo kulanka qodobka gaarka ah ee ay wajahaan haweenka si ay u helaan xuquuqdooda Guriyeynta, Dhulka iyo Hantida ee Soomaaliya.

Ujeedooyiinka

Dhamaadka kulanka, ka qaybgalayaashu waxay awoodi doonaan inay:

- Sharaxaan fikradda Guriyeynta, Dhulka iyo Hantida iyo sida ay ugu habboon tahay talaabada horumarka loo qaadayo dhanka xalalka waara
- Aqoonsadaan oo kala saaraan arrimaha waaweyn ee la xiriira Guriyeynta, Dhulka iyo Hantida ee ka hortaagan bulshooyinka uu saameyey barakaca inay u horumaraan xagga xalalka waara
- Aqoonsadaan arrimaha gaarka ah ee ay haweenku kala kulmaan helitaanka xuquuqdooda Guriyeynta, Dhulka iyo Hantida

Fariimaha Muhimka ah

1. **Xuquuqda Guriyeynta, Dhulka iyo Hantida waa xuquuqul insaan caalami ah oo la aqoonsan yahay oo qayb ka ah xuquuqda helitaanka nolol ku filan**
2. **In badan darbiyada oo kaliya iyo saqafka ka sareeya madaxa qofka, xuquuqda Guriyeynta, Dhulka iyo Hantida ayaa fure u ah xaqiijinta badbaadada, amniga iyo sharafta, helitaanka hab-nololeedka iyo heer nololeed ku filan. Sidaa darteed waxay udub dhexaad u yihiin geeddi-socodka xalalka waara.**
3. **Iyadoo aan loo eegin mudada ay deganaanayaan, Bulshooyinka Barakacayaasha ah waa inay helaan xuquuqdooda Guriyeynta, Dhulka iyo Hantida , oo ay ku jiraan amniga muddada lahaanshaha ee ka difaacda ka saarista/rarista qasabka ah.**

Ogsoonow in qoraallada fududeynta iyo talooyinka iyo sidoo kale farriimaha muhiimka ah ay ku jiraan bog kasta oo ku jira sanduuqa qoraalka.

Habka Gudbinta

Hab-dhismeedka Kulanka

Waxaad kubilaabi kartaa kulanka adoo tusaya fiidiyowga ReDSS ee "fahamka Guriyeynta, Dhulka iyo Hantida Soomaaliya" kaas oo laga heli karo khadka tooska ah ee labada luuqadood English (7 daqiiqo) iyo Somali` (11 daqiiqo)

Kulankaan wuxuu u qaybsan yahay saddex qaybood oo waaweyn:

1. **Waa maxay guriyeyn, dhul iyo hanti?**
   Qeybtan gaaban waxaa looga dan leeyahay in la qeexo waxa ereyada loo soo gaabiyay HLP(Guriyeynta, Dhulka iyo Hantida) ka dibna la bilaabo aqoonsiga sababta ay xudun ugu yihiin xalalka waara iyadoo loo marayo qaybta fikirka isweydaarsiga gaaban ee guud.

2. **In ka badan saqaf ka sarreeya madaxayaga**

Ujeeddada qaybtani waa in la muujiyo in Guriyeynta, Dhulka iyo Hantida ay tahay, ka hor wax kasta, xuquuqul insaanka oo laga soo dheegtay xuquuqda nabadgelyada qofka, xaq u yeelashada guriyeyn ku filan iyo xuquuqda kale ee dhaqaale ee bulshada sida xuquuqda shaqo, tusaale ahaan. Qaar qaabdhismeed sharci ah iyo hagis ayaa loo sameeyay si loo taageero mas'uuliyiinta qaranka iyo la-hawlgalayaashooda si loo hubiyo in bulshooyiinka uu saameyey barakaca ay u helaan xuquuqda Guriyeynta, Dhulka iyo Hantida si loogu sii socdo dhanka xalka waara. Soomaaliya, dastuurkeeda, iyo siyaasadaha dhowaan la horumariyey ee lagu diirada lagu saarayo barakacayaasha iyo qaxootiga soo

noqday ayaa bixinaya marino iyo hagitaan lagu xushmeynayo, lagu ilaalinayo, laguna fulinayo xuquuqdan.
Markaa qeybta labaad ee kulanka wuxuu ku saabsan yahay sugnaanta amniga deganaashaha iyo xaq u lahaanshaha guryeyn ku filan kuwaas oo ah waxyaabaha muhiimka u ah xuquuqda Guriyeynta, Dhulka iyo Hantida iyo xalalka waara. Waxay ka bilaabaneysaa noocyada kala duwan ee habeynta mudada degaanaashaha si loo hubiyo helitaanka Guriyeyn, Dhul iyo Hanti iyo amniga muddada deganaashaha. Tani waxay fursad siineysaa in lagu adkeysto xaqiiqda ah iyadoo aan loo eegin noocyada habeynta iyo in habeynta tahay mid rasmi ah ama aan ahayn, sharci ama aan sharci ahayn, xaq u lahaanshaha helitaanka amniga muddada deganaashaha, inaan xoog looga saarin sidoo kale xaq u lahaanshaha guriyeyn ku filan waxay ansax ku yihiin dhamaan, oo ay kujiraan barakacayaasha iyo qaxootiga soo noqday. Labadii bog ee ugu dambeysay qaybta waxay si cad u qeexayaan fikradaha amniga muddada deganaashaha iyo guryeyn ku filan.

3. Guriyeyn, dhul iyo hanti iyo xalalka waara

Ujeedada ugu weyn ee qaybtani waa iskuxirka guriyeynta, dhulka iyo hantida iyo horumarka xalalka waara iyadoo loo marayo laba hawl oo waaweyn:
- Hawl kooxeed ujeedadiisu tahay in lagu ogaado caqabadaha ugu waaweyn ee hortaagan amniga muddada deganaashaha iyo helitaanka xuquuqda guriyeynta, dhulka iyo hantida ee Soomaaliya iyadoo loo marayo daraasad kiisas iyo milicsiga guud. Caqabadaha ugu waaweyn ayaa markaa la isugu geyn doonaa sida caqabadaha ka dhaca meesha barakaca iyo caqabadaha ka dhaca goobta asalka ah si loo muujiyo xaddiga arrimaha la xiriira guriyeynta, dhulka iyo hantida ay saameyn ku yeelan karaan xalalka waara, hadba waddada ay qaaddo.

- Hawsha ugu dambeeysa oo ah mid ikhtiyaari ah ayaa loogu talagalay in lagu muujiyo xiriirka u dhexeeya shuruudaha IASC, iyo gaar ahaan guriyeynta, dhulka iyo hantida iyo helitaanka dukumiintiyada, hab nololeedka iyo shaqada, wada noolaanshaha bulshada, iyo heer nololeed ku filan.

Wakhtiga

Kulankaan waxaa loo qorsheeyay inuu socdo hal saac iyo bar ilaa labo saacadood iyadoo kuxiran inaad video-ga shido iyo inaad howlaha oo dhan sameyso iyo inkale.

- Qiyaastii 20 daqiiqo uu qaato kulanka ugu horreeya haddii aad shido fiidiyowga
- 20 daqiiqo oo qaadato qeybta labaad
- 50 daqiiqo oo qaadato qeybta ugu dambeysa oo ay ku jiraan labada hawl 2 iyo 3.

Hawlaha

1. **Hawsha 1aad: Sabab Guriyeyn, Dhul iyo Hanti?**

Kani waa kulan maskaxeed gaaban oo aan socon karin wax kabadan 7 daqiiqo ujeedadiisuna tahay kajawaabida su'aasha soo socota: Maxay xuquuqda guriyeynta, Dhulka iyo Hantida udub dhexaadka ugu yihiin xalalka waara, sidaa ay adiga kula tahay?

Tusi dulucda bogga ka dib kulan maskaxeedka si loo soo koobo loona soo jeediyo qodobbo aan la xusin.

2. **Hawsha 2aad: Arrimaha la xiriira guryaha, dhulka, iyo hantida ama caqabadaha ay la kulmaan bulshooyinka barakacayaasha ay saameeyeen.**

Tani waa hawl kooxeed. U qaybi dukumintiga dhacdooyinka kiiska. U qoondee jilaa koox kasta oo weydii kooxda inay qaadaan laba talaabo:

1. Iyadoo ku saleysan dhacdooyinka kiisaska, cadee arrimaha la xiriira guriyeynta, Dhulka iyo Hantida ee ay wajahayaan jilayaasha:
- Deegaanka ay magan galyada u joogaan
- Deegaanka ay ka soo jeedaan
2. Aqoonso arrimaha ugu badan ee la xiriira guriyeynta, Dhulka iyo Hantida ee ay la kulmaan dadka ku barakacay Soomaaliya

3. **(ikhtiyaar): Xiriirka ay wadaagaan guriyeynta, Dhulka iyo Hantida iyo shuruudaha kale ee xalalka waara.**

- Abuur shan kooxood oo u qoondee koox kasta hal shuruud.
- Weydii inay tusaan xiriirka ka dhexeeya Guriyeynta dhulka iyo Hantida iyo shuruudaha loo qoondeeyey iyo inay tusaalooyin ka bixiyaan xaaladda Soomaaliya.

Diyaarin

- ☐ Daabac qoraal casharada ku saabsan fikradaha laxiriira ka saarida guryaha iyo qeexitaannada oo la qaybin doono dhammaadka kalfadhiga.
- ☐ Daabac daraasadaha kiisaska ee hawsha labaad. Waad iska jari kartaa oo kaliya waxaad siin kartaa koox kasta jilaagooda loo xilsaaray. Kaliya daabac shan illaa lix ka mid ah.

Xog Faaido leh

- ☐ Hagayaasha guryo ka saarida Qaranka, Dowlada Federaalka Soomaaliya, 2019

- ☐ Hab maamuus kumeelgaar ah oo ku saabsan qaybinta dhulka guryaha loogu talagalay dadka qaxootiga ah ee soo noqday iyo Barakacayaasha, Dowladda Federaalka Soomaaliya, 2019
- ☐ Siyaasadda Qaranka ee ku saabsan Qaxootiga-soo-noqday iyo Barakacayaasha ku sugan Soomaaliya, Dowladda Federaalka Soomaaliya, 2019
- ☐ Tallaabooyinka la qaaday ee lagu taageerayo ka hortagga guriyo ka saarista khasabka ah inta lagu gudajiray wakhtiga caabuqa COVID-19, Xafiiska Qaramada Midoobay ee Xiriirinta Arrimaha Bani'aadamnimada, 2020.
- ☐ Khataraha joogtada ah, musiibada soo socota: Kiisaska degdegga ah ee hakinta ka guriyo ka saarista, Kooxda difaaca, Soomaaliya, Abriil 2020
- ☐ Sahanka himilada ee ReDSS, Guriyeynta, Dhulka iyo Hantida, 2020.
- ☐ Casharrada Laga Bartay Saddexda dalada Eu Re-Integ (Eidacs, Jsc, Sdsc), REDSS, Oktoobar 2019
- ☐ Tilmaamaha Magaalada Kismaayo, Waraaqaha Shaqada iyo Falanqaynta Meelaha ee Qorshaynta Magaalooyinka, Wasaaradda Howlaha Guud ee Jubaland, Dib u dhiska iyo Guriyeynta, Oktoobar 2020
- ☐ Culees aan muhim ahayn: guriyo ka saaritaan qasab ah iyo caabuqa Covid-19, qoraalka kooban ee hay’adda NRC, Julaay 2020.
- ☐ Mabaadi'da Pinheiro ee Qaramada Midoobay ee Guryeynta iyo Soo Celinta Hantida ee Qaxootiga iyo Barakacayaasha, 2005
- ☐ Mabaadi'da Hagaya Barakaca Gudaha
- ☐ Shirweynihii Kampala ee ku saabsanaa ilaalinta iyo kaalmaynta dadka ku barakacay gudaha Afrika
- ☐ Qaab dhismeedka IASC ee xalka waara ee dadka gudaha ku barakacay, 2010 A
- ☐ xdiga Caalamiga ee Xuquuqda Dhaqaalaha, Bulshada iyo Dhaqanka, 1996
- ☐ Heshiiska OAU ee xukumaya qaybaha gaarka ah ee dhibaatooyinka qaxootiga ee Afrika
- ☐ Heshiiskii Jeneva ee 1951 iyo habmaamuuska 1969 Qaab-dhismeedka IASC ee ku saabsan xalalka waara ee dadka gudaha ku barakacay, 2010
- ☐ Axdiga Caalamiga ee Xuquuqda Madaniga iyo Siyaasadda, 1966 Axdiga Caalamiga ee Xuquuqda Dhaqaalaha, Bulshada iyo Dhaqanka, 1996
- ☐ Mabaadi'da Aasaasiga ah ee UN-ka iyo Tilmaamaha ku aaddan guriyo ka-saarista iyo Barakicinta ku saleysan horumarka, 2007 Mabaadi'da Hagayaasha ee UN ee Amniga Xuquuqda Dadka Saboolka ah ee Magaalooyinka ah, 2013 Hay'adda Cunnada iyo Beeraha (FAO) Tilmaamaha

Mutadawacnimada ah ee Mas'uuliyadda Maamulka Dowladnimo ee Dhul, Kalluumeysi iyo keymo.

- ☐ Heshiiska ILO No.169 ee xuquuqda dadka asaliga ah
- ☐ Heshiiska baabi'inta dhammaan noocyada Takoorka ka dhanka ah Haweenka (CEDAW) iyo dhammaan hab maamuuskiisa